

**ADEEGYADA QAXOOTIGA**

## GAADIIDKA GUDAHA MAREYKANKA

**M**arkii aad timaadid bulshadaada xaafadaada cusub, waxaad u baahanaysaa inaad baratid sida looga tago hal meel ee loogu tago meel kale si sahlan. Dad badan ayaa baa gaari ku kaxeeyo Mareykanka, laakiin lahaanshaha baabuurku waa qaali oo laga yaabo inaysan marka koowaad macquul kuu noqon. Inta badan bulshooyinka dad waynaha waxay leeyihiin hab ama qaabab badan ee gaadiidka bulshada oo loo isticmaali karo in lagu gaaro Hayaddaada Dib u dejinta, meeshaada shaqada (marka lagu shaqaaleeyo), sidoo kale sida dukaamada, bangiyada, iyo adeegyada kale ee bulshada dad waynaha. Barashada sida loo isticmaalo gaadiidka bulshada dad waynaha lagu aadayo halka aad rabtid oo aad u baahantahay inaad si badbaado ah ku aadid way adagtahay tallaabada koowaad ee lagula lagu qabsanayo bulshadaada cusub. Hayaddaada Dib u dejinta ayaa ku siineyso macluumaad ku saabsan gaadiidka bulshada dad waynaha sida ugu dhaqsiiha badan kadib markaad timaado.

### GAADIIDKA BULSHADA

Gaadiidka gudaha dad waynaha ee Mareykanka wuxuu ka duwan yahay meel ilaa meel kale. Meelaha Magaalooyinka qaarkood, waxay kugu qaadan kartaa ku dhawaad meel walba aad rabtid inaad aadid. Meelaha kale, waxay shaqeyn karaan kaliya marmar ama laga yaabo inaan la helin.

Waxaa jiro sadex nooc ee gaadiidka bulshada: basaska, tareenada mara wadooyinka dhulka hoostooda ah, iyo tareenada dadka raacaan. Waxay caadi ahaan ku shaqeyaan jadwal oo joogsadaan goobaha boosteejooyin qaar calaamadeysan si ay ugu ogolaato si ay u ogaadaan raacayaasha inay ka dagaan ama fuulaan. Inta badan waqtiga, waxaad u baahanaysaa inaad iibsatid tikid xili hore ama bixisid xiliga aad raaceysid si loo isticmaalo gaadiidka bulshada. Mararka qaar, waxaad u baahanaysaa qiimaha saxda ah ama kaarka korontada baska oo leh lacag ku filan si ayu daboosho noolka lacagta safarkaaga. Mararka qaar, qarashaadka qiimahaaga waxaa lagu go'aansadaa dhirirka fogaanshaha safarkaaga. Kaararka

#### Gaadiidka gudaha Mareykanka



baska waxaa laga heli karaa istaanada dukaamada iyo goobaha kale halka aad ku isticmaali kartid kaashka lacagta ama kaarka deynta bangiga ee deynta ama debit si aad u buuxiso kaarkaaga baska.

Inta lagu jiro saacadaha mashquulka, qiimaha gaadiidka bulshada dad waynahu wuu ka sareyn karaa waqtiyada kale ee maalinta. Tareenada iyo basaska aad ayay u buux dhaafi karaan inta lagu jiro saacadaha mashquulka, iyo magaalooyinka waa weyn, waxay qaadan kartaa karaan muddo aad uga dheer inaad ku tagtid goobtaada. Waa muhiim inaad u ogolaatid waqti dheeraad ah inta lagu jiro saacadaha mashquulka haddii aad rabtid inaad timaadid shaqada ama haddii aad haysatid ballan waqti xasaasi ah leh.

Inta badan gaadiidka bulshada dad waynaha wuxuu leeyahay kuraas si wanaagsan loo calaamadeeyay, oo loo sii qabtay waayeelka, curyaanka, iyo haweenka uurka ah. Waxaa la filanayaa in rikaabka caafimaadka qabaa ay banayn doonaankuraastaan marka loo baahanyahay.

### **SOCODKA IYO BASKIIL WADASHADA**

Socodka iyo raacida baskiilka baaskeel qaali ma aha oo qaabab ku haboon gaadiid raaca taas oo sidoo kale caafimaadkaaga u wanaagsan. Waxaa jiro sharciyo Maryeykanka ee sharciyeeya socodka iyo baskiil wadashada. Ogow astaamaha baabuurta iyo siinyaalooyinka calaamadaha si markaas aad badbaado u tihid marka aad ku lugeyneysid bulshadaada xaafadaada. Isticmaal dhinacyada lagu lugeeyo oo hubi inaad ka goysid wadada meelaha laga gudbo ama geesaha. Ku baakin dhigo mootadaada aagaga meelaha loogu talo galay oo u xir si illaalsan. Magaalooyin badan waxay siiyaan haadad wadooyin gaar ah baskiilada iyo sidoo kale waxay leeyihiin sharciyada baabuurta iyo badbaadada ee gaarka u ah baskiileysda. Goobo badan, koofiyadaha baskiilada waa loo baahanyahay sharci ahaan iyo qaar ka mid ah caasimadaha waxay u baahanyihiin shati baskiileysda sidoo kale. Waa muhiim in la ogaado oo la raaco sharciyada baabuurta ee bulshadaada si markaas si badbaado ah loo baskiilka loogu wato.

Caasimadaha qaarkood waxay leeyihiin barnaamijyada wadaagida baskiilka taas oo u ogolaaneyso wadayaasha inay kireystaan isticmaalaan waqti gaaban. Inta badan barnaamijyadan waxay ka shaqeeyaan istaanada boosteejada baskiilka ee agagaarka caasimada oo raacayaasha ayaa bixiya baskiilka ka imaanayo hal istaan boosteejo ilaa mid kale halka ay uga tagayaan baskiilka qof raacaha kale ah. Caadi ahaan, raacayaasha waxaa looga baahanyahay inay ku bixiyaan kaarkooda deynta ama credit ama debit, ama waa inay ka noqdaan xubin barnaamijka marka hore. Qaar ka mid ah barnaamijyada waxay haystaan codsiyada taleefonada casriga ah ee u ogolaanayo raacayaasha inay helaan baskiilo diyaar ah oo maamulaan lacag bixinta.

### **Cultural Orientation Resource Exchange**

8719 Colesville Road, 3rd Floor • Silver Spring, MD 20910

For more information, visit the CORE Resettlement Navigator website at [corenav.org](http://corenav.org).



The contents of this fact sheet were developed under an agreement financed by the Bureau of Population, Refugees, and Migration, United States Department of State, but do not necessarily represent the policy of that agency and should not assume endorsement by the Federal Government. **This material is in the public domain and may be reproduced.**

### **CASHARKA INGIRIISKA INGIRIIS AH / ENGLISH LESSON**

**Aaway boosteejada baska/istaanka wadada dhulka hoosteeda Aaway tareenka dhulka hoostiisa mara?**

Where is the bus stop/subway station?

**Halkee ayuu baskan aadaa/halkee tareenkan aadaa?**

Where does this bus/train go?

**Waa intee noolku Waa imisa lacagtu?**

How much is the fare?

**Sidee ayaan ku tagi karaa maktabada/bangiga/farmashiga/dukaanka booshariga?**

How can I get to the library/bank/pharmacy grocery store?

### **RAAC WADAAGIDA BAABUURTA LA WADAGAAGO IYO TAKSIYADA**

Raac adeegyada baabuurta la wadaago wadaagida, sida Lyft iyo Uber, waxaa laga heli karaa magaalooyin badan iyo magaalooyinka ku yaala Mareykanka. Xaaladaha inta badan, raac baabuurta la wadaago wadaagida aad ayay uga raqiisantahay oo aadna ugu haboontahay taksiyada dhaqameed, laakiin taleefonada casriga ee leh abka ku haboon wuxuu u baahanyahay inuu habeeyo raacitaanka, iyo xisaabta akoonka bangiga leh kaarka deynta ama debit waxaa looga baahanyahay lacag bixinta.

Tagaasiyada wadada ayaa loogu gacan haadin karaa ama laga heli karaa aagaga meelaha loogu talagalay ee qaybo ka mid ah magaalooyinka, ama waxaad habbayn heli kartaa raacitaanka adiga oo soo wacayo shirkada taksiga haddii aad ku hadashid af Ingiriiska. Darawaliinta taksiga waxay caadi ahaan ogolaadaan kaash lacag ama kaararka bangiga laakiin waa inaad xaqjiisaa qaabka lacag bixinta ka hor inta aadan raacin.

Raacida wadaagida Wadaagitaanka baabuurta iyo taksiyada aad ayay uga qalisanyihiin gaadiidka bulshada oo lagugula laguna talin maayo isticmaalka maalin walba. Si kastaba, waxay ku caawin u noqon karaan markaad ku jirto xaaladaha degdega.

### **LAHAANSHAHA IYO KA XEYNTA GAARI**

Lahaanshaha gaari gaar ah baabuur aad leedahay wuxuu la yimaadaa faa'idooyinka iyo masuuliyadaha. Qarashaadka Dhaqaalaha baabuurta la xiriirto xiriira caadi ahaan waxaa ku jiro lacag bixinada bixinta gaariga kaashka ah (haddii lagu iibsado iibiyo deyn); lacagaha caymiska; khidmadaha ruqsada iyo diiwaangelinta; iyo baarkinka, shidaalka, iyo kharashaadka dayactirka. Qarashaadkaan Dhaqaalaha ku daadin karaan dakhligaaga sida ugu dhaqsiyaha badan, marka koowaad waxaad u baahan kartaa inaad isticmaashid gaadiidka bulsho oo aad ku socotid. Marka dambe, markii aad shaqo heshid oo aad awoodi kartid qarashaadka dhaqaalaha gaari, waxaad go'aansan kartaa inaad gaari iibsato. Imtixaanka wadista gaadhiga gaarigaaga iyo ruqsada waxaa looga baahanyahay qof walba ee oo gaari wadaya kaxeynaya.